



Baaritaanka luqadda

Waaxda socdaalka (imaagareeshinka) waxaa ay kugu samayn kartaa baaritaan la xiriira dhanka luqadda, haddii aadan u soo gudbin caddayn dhab ah oo la aamini karo oo ku saabsan aqoonsigaaga shakhsiyadeed. Ujeedadada laga leeyahay baaritaanka luqadda waa sidii lagu hubin lahaa inaad ka soo jeeddo goobta aad sheegtay inaad ka timid.

Haddii adiga lagaa gaaro go'aanka ah in baaritaanka luqadda ah lagugu sameeyo, Wawaad waaxda socdaalka (imaagareeshinka) ka heleysaa qoraal u yeerid ah oo arrinkaas ku saabsan, waxaana lifaaq ahaan ula socda qoraalkaas hagis ama tilmaabixin ku saabsan baaritaanka luqadda.

Inta badan marka howshaas la samaynaayo turjubaan looma soo qabto, sidaas awgeed waa inaad si taxaddar leh u soo akhrisataa tilmaanbixintaas laguu soo diray.

Qaab sidee ah ayaa loo sameeyaa baaritaanka luqadda?

Waaxda socdaalka (imaagareeshinka) ayaa adiga kuu qabanaysa waqtiga ballanka, waxaana ay waaxdu kuugu yeeri doontaa kulan arrinkaas ku saabsan. Wawaadna kulankaas kula kulmi doontaa qof shaqaale ah oo ka tirsan waaxda socdaalka, kaasoo duubi doonaa hadalkaaga muddo 20 daqiico ah.

Tilmaanbixinta ama hagista ku saabsan baaritaanka luqadda

- Shaqaalahaa waaxda socdaalka ayaa adiga kuu sheegaaya, marka duubitaanka la bilaabaayo. Qofka shaqaalahaa ah ma hadli karo inta duubistu ay socoto.
- Si furan oo xor ah u hadal muddo 20 daqiico ah. Mawaadiicda wanaagsan ee laga hadli karo waxaa tusaale ahaan ka mid ah kuwa ku saabsan cuntada, hiwaayadda, bay'adda ama degaanka, safarkii aad Finland ku timid, guriga, xafladaha diiniga ah ee dalkaaga hooyo, isboortiga iyo qoyska.
- Ha sheegin wax ku saabsan maclumaadkaaga shakhs ahaaneed, sida magacaaga ama kan xubnaha qoyskaaga, amaba sababta aad qaxootinnimada u soo codsatay.
- Shaqaalahaa waaxda socdaalka ayaa kuu sheegaaya, marka duubistu ay dhammaato.

Maxaa dhacaaya baaritaanka luqadeed kaddib?

Kulankaas hadal duubista kaddib, waxaa waaxda socdaalku ay hadalkii la duubay u diraysaa khubarada arrinkaas ku shaqada leh, kuwaasoo baaritaan ku samaynaaya hadalkaagii. Arrinkaa kaddib waxaa natijada ka soo baxday baaritaanka luqadda qaab qoraal ahaan ah loogu soo diri doonaa waaxda socdaalka.

Haddii natijada ka soo baxday baaritaanka luqadda ay noqoto mid ka horimaanaysa wixii aad hore u sheegatay ee ku saabsanaa halka aad ka soo jeeddo ama magaalada aad ka timid, waaxda socdaalku waxaa ay arrinkaas kaala yeelan doontaa waraysi ama in lagaa dhegeysto fikraddaada arrinkaas ku saabsan, kaasoo qaab qoraal ama hadal ahaan ah lagaaga qaadi doono. Wawaana waraysigaa lagula yeelanaayo aad ku sheegi kartaa caddayntaada ama wixii fikraddaadda ah ee arrinkaas ku saabsan.